

# CABBIRRADA QALLN-JEBINTA EE GOBOLKA NEW YORK

## Jiilaal (Winter) 2020
## Shirka Xogta Deegaanka

New York State
EDUCATION DEPARTMENT
Knowledge › Skill › Opportunity

# AJANDAHA SHIRKAN DEEGAAN

- **Salaan iyo Isbarasho/Hordhacyo: Fiidiyow furitaan oo ka socda Hormuudka Guddiga Waxbarashada, Betty Rosa**
- **Hadallo ka socda Xubnaha Guddiga Waxbarashada Maxalliga**
- **Power Point: Cabbirrada Qalln-jebinta ee Gobolka New York**
- **Wadahadallado Koox: Jawaab-celinta daneeyaha ee Tilmaamaha Shanta Su'aalood**
- **Fikrad Wadaagida**
- **Hadallada Xiritaanka: Muraaqibka Degmo Dugsiyeedka BOCES ama Wakiillada Wayn ee 5 & Guddiga Maxalliga**

# CABBIRRADA DIB U IMTIXAANKA QALLN-JEBINTA EE GOBOLKA NEW YORK

- Hormuud Rosa waxaa ka go'an inay dib uga fekirta cabbirrada qalin-jabinta ee gobolka New York inta lagu jiro bisha Febraayo 2019 iyo bisha Luulyo 2019, Gudiga Waxbarashda ayaa waxay ku dhawaaqeen inay abuuri doonaan Gudi (Blue Ribbon) oo dib u eegis ku sameeya talaabooyinka ama cabbirrada qallin-jebinta dugsiga sare ee Gobolka oo waxay dib u xaqiijinayaan micnaha ay leedahay helitaanka shahaadada Gobolka New York.
- Guddigu wuxuu baari doonaa waxay tahay shahaadada Gobolku inay muujiso si loo hubiyo heerka ugu sarreeya ee waxbarashada iyo sinnaanta loogu talagalay arday kasta oo wax ka dhigta Gobolka New York. Guddigu waxay tixgelin doonaan in lagu daro qiimaynno kale ee guulaysigu si ka sii fiican uu ugu adeeggi doono ardayda kaladuwan ee New York inay u noqdaan tusmo waxay yaqaaniin iyo haddii ay mihnad iyo tacliin sare ahaan diyaar yihiin.

# FIIDIYOWGA HORMUUDKA GUDDIGA WAXBARASHADA BETTY A. ROSA



# WAA MAXAY SABABTA AY GUDDIGA WAXBARASHADA U EEGAYAAN CABBIRRADA QALLIN-JABINTA?

**In la Dhiirigeliyo Sinnaanta dhanka Waxbarashada ee Dhammaan Ardayda New York oo Dhan**

- Mudnaanta koowaad ee Guddiga Waxbarashada iyo Waaxda waa in **la abuuro waxbarasho ay u siman yihiin dhammaan ardayda gobolka New York oo dhan.**
- Heerka qallin-jebinta oo si tartiib ah kor ugu socdo, laakin **gondaloolooyin dhanka guusha ayaa sii jira** – gondaloolooyin kala go'daan ka dhigta ardayda middabka, ardayda naafada ah, bartayaasha luqadda Ingiriiska, iyo ardayda daqligoodu hooseeyo, ka reebaysa kuwa assaagooda ah kuwaas oo ah caddaan dhigta iskuulka degmo dugsiyeedka ku yaala oo baahidooda hooseeysa.
- Nidaamka qofkasta uma shaqeeyo, oo arday badan ayaa – gaar ahaan ardaydeeda kuwooda ugu nugul – ayaa dugsiga sare ka baxa iyagoon haysan shahaadada dugsiga sare. New York iyo gobollo kale waxay la daalaadhacayaan heerka qallin-jebinta kaas oo si aad u hooseeya u soo fiicnaanaya, haddiiba ay jirto, iyo sidoo kale **faraqa u dhaxeeya guusha ee saamaysa gondaloolooyinka fursadda joogtada ah.**

**Si loo xaqiijiyo in Ardaydeenu ay yihiin kuwo ku Mashquulsan Iskuulka oona loo Diyaariyay Howlaha Qarniga 21aad :**

- Waana wax la doonayo in lagu hubiyo waxa ardaydu ay baranayaan yihiin wax iyagu quseeyo, waxtarna u leh bulshada oona iyagu u diyaarinaya kulliyad, shaqo iyo gacan kageysasho shacab.
- Iyada oo ardaydu ay siinayso fursado badan oo ay shiishaa ku saaraan waxyaabaha iyaga ay danaynayaan, intiiba ay gacan ka geysanayaan iskuulka ay sii dhiganayaan oo meel wanaagsan ka joogaan ayaa ka dhigeysa kuwo nolosha ku guuleysta.
- Ardayda ayaa waxay u baahan inay u diyaar garoobaan inay ka faa'iideystaan fursadaha shaqo ee Qarniga 21aad , iyo sidoo kale ay qaabilaan dalabaadka iyo loolanka qarniga.

# GUDDI TAYO TACLIIMEED OO CABBIRRADA QALLIN-JEBINTA

**Hadafka:**

Si loo qaado hanaan loo wada dhan yahay oo laga soo fekirey oo dib u xaqiijinnaya waxay ay ka dhigan tahay shahaadada dugsiga sare ee Gobolka New York iyo waxa la doonayo inay u dhignaanto si loo hubiyo waxbarasho heer sare ah iyo sinnaan loola dhaqmayo dhammaan carruurta Gobolka New York.

**Ujeedada:**

Ujeeddada Guddigu waa in ay dib muraajico ugu sameeyaan cilmi baaris, ku celcelin iyo qanuun iyo in talo laga ururiyo gobolka oo dhan, si wax looga qabto talosiinta lagu wargeliyay in:

- dib looga fekiro shahaada iminka la bixiyo shuruudooyinka
- la xaqiijiyo in dhammaan ardayda oo dhan ay heli karaan cabbirro dhowr ah ee qallan-jebinta; iyo
- la xaqiijiyo qorshe ka gudub ah ee u oggolaanaya wakhti loogu diyaargaroobo iyo in lagu hirgeliyo isbeddel kasta

# WAJIYADA SHAQADA

**Wajiga I: Xog Ururin & Waxbarasho**

Koox-hawleed Gobol
- Guddi(guddiyo)
- DS/Big 5
- SED

Dib-u-eeg Daraasaada iyo Hab dhaqanka ka jira Gobollada Kale

Isugeey Jawaab-celinta Gobolka iyo Daneeyayaasha ee Su'aalaha Tilmaamaha

**Wajiga II: Guddi Tayo Tacliimeed**

**Guddi Tayo Tacliimeed**
**Kulma oo Talooyin ka soo Saara**

**Wajiga III: Wadahadalka Guddiga**

**Guddiga Waxbarashada**
**Soo Jeedin iyo ka Wada-hadal Qaanuun**

NYS ED .gov

# JADWAL NUQUL QORAAL HORE

## Wajiga I: Xog Ururin & Waxbarasho

- **Noofambar 2019 illaa Abril 2020:**
  - U fiirsiga qoraallada cilmibaarista iyo waxqabadyada ka jira gobollada kale. Guddiga ugu Warbixi Gu'a (Spring) 2020
  - Koox hawleedka deegaan waxay kullamada ay qaban doonaan inta lagu jiro bisha Janaayo si ay u soo ururiyaan jawaab gelinta laga helo gobolka oo dhan.
- **Xaggaaga 2020:**In la aasaaso Guddi Tayo Tacliimeed (Blue Ribbon Commission) (BRC) iyo in la qoro jadwalka kulanka.
- **Xaggaaga (summer) 2020:**Ururi Jawaab celinta Shirka Deegaanka

## Wajiga II: Guddi Tayo Tacliimeed

- **Seteember 2020:**(Kulanka koowaad ee Guddiga BRC ayaa shiraya oo caddaynaha xadka howshiisa.
- **Oktoobar 2020:**Shirka labaad ee Guddi Tayo Tacliimeed si loo garto aagagga mudnaanta la siinayo iyo qaab loogu talagalo horay u socodsiinta. In la aasaaso kooxo hoosaad loogu talagalay aagagga mudnaanta.
- **Nofeembar 2020** Febraayo 2021:Kulanka kooxo hoosaadka.
- **Maarso 2021** Maajo 2021:Kooxo hoosaadka ayaa soo saari doona talooyinka la soo jeediyay.
- **Xagaaga** Deyrta (Fall) 2021:Kooxo hoosaadka ayaa horay ugu sii gudbin doona talooyinka ay BRC soo jeedisay.
- **Deyrta 2021** **Jiilaalka (Winter)** 2022:Guddiga BRC ayaa waxay dhammeystireysaa talooyinka la soo jeediyay oo warbixin ayaa la diyaarinayaa.

## Wajiga III: Wadahadalka Guddiga

- **Jiilaal 2022:**Warbixinta ugu damabaysa oo Guddiga Tayada Tacliinta ayaa la soo hordhigi doonaa Golaha Maamulka Tacliinta si ay u texgeliyaan.

# WAJIGA I: URURINTA & BARASHADA XOGTA KULAMADA & JAWAAB-CELINTA DEEGAANKA



- **Kulamada Deegaanka ee Degmo Dugsiyeed Kasta ee Garsoorka:**
  - Ugu yaraan hal kulan ee Degmo Dugsiyeed kasta in la qabto inta u dhaxaysa Janaayo ilaa Abriil 2020
  - La gaarsiiyo tiro baaxad leh ee daneeyayaasha iyo ururrada deegaanka si loo xaqiijiyo in goob kasta ay wada-hadalka qayb ka yihiin
  - Qaabka kulamada ayaa noqon doona mid fidiya wada-hadallo keena fekraddo bahaysan oo qeexan, isku si ah oo qaab fekir leh
  - Fekraddaha iyo xogta waxaa lagu qaban doonaa deegaan kasta
- **Sanduuqa Iimeelka Faallada Dadweynaha:**
  - La sameeyo sanduuq iimeel oo faallada dadweynaha kaas oo loogu talagalay kuwa jecel in fekrado iyo aragtiyo ay ka dhiibtaan ee waa kuwa aan soo xaadiri karin.

**GradMeasures@nysed.gov**

# SHURUUDAHA SHAHAADADA GOBOLKA NEW YORK: QAYBINTA BUUNDADA

## Xulashada Ardayga ee Xulashada Koorsada

- Maadooyinka intooda badan, ardayda ayaa xulanaya koorsooyinka ay rabaan inay qaataan.

## Koorsooyinka La Iska Doonayo

- Caafimaadka (½ dhibac ayaa loo baahan yahay)
- Aqoonta Gobolka iyo Juquraafi (2 dhibcood ayaa loo baahan yahay)
- Taariikhda Mareykanka (1 dhibac ayaa loo baahan yahay)
- Kaqaybqaadashada Dowladda (½ amaahda ayaa loo baahan yahay)
- Dhaqaalaha (½ dhibic loo baahan yahay)

| | TIRADA UGU YAR EE DHIBCAHA |
|---|---|
| English | 4 |
| Aqoonta Bulshada (eeg qoraalka #6)<br>Waxaa loo qaybiyay sida soo socota:<br>Taariikhda Mareykanka (1)<br>Taariikhda Gobolka iyo Juquraafi (2)<br>Kaqeybgalka Dowlada (½)<br>Dhaqaalaha (½) | 4 |
| Sayniska<br>Waxaa loo qaybiyay sida soo socota:<br>Sayniska Nolosha (1)<br>Sayniska Jirka (1)<br>Sayniska Nolosha ama Sayniska Jirka (1) | 3 |
| Xisaabta | 3 |
| Luuqadaha Aan Ingiriisiga Ahayn (LOTE) | 1 (**) |
| Farshaxanka Muuqaalka, Muusikada, Qoob ka ciyaarka, iyo/ama Masraxa | 1 |
| Waxbarashada Jimicsiga (kaqeybgal simistir kasta) | 2 |
| Caafimaadka | 0.5 |
| Maadooyinka la doorto | 3.5 |
| Isu geyn | 22 |

# SHURUUDAHA QIIMEYNTA DARIIQYO DHOWR AH (4+1)

## 4

**Ardayda oo dhan waa inay barmoosaan 4 qiimeyn ayaa loo baahan yahay (maado kasta mid)**

- Ingiriis
- Xisaabta
- Sayniska
- Aqoonta Bulshada

## +1

Dariiqyada

- STEM
- Maadooyinka Aadanaha
- Farshaxan
- LOTE
- CTE
- CDOS

Haddii ardayda ay keeni waayaan buundada baasida ee 65 imtixaanaadka Dugsiga Sare, waxaa dhici karta inay xaq u yeeshaan:

- Rafcaano
- Shabaqyada Badbaadada
- Go'aaminta Muraaqibka

STEM: Saynis, Teknooliji, Ingineering, Xisaab
LOTE: Luqad aan Ahayn Ingiriiska
CTE: Xirfad Shaqo & Waxbarashada Farsamada
CDOS: Horumarinta Xirfadda iyo Tacliinta Shaqada

# NOOCYADA SHAHAADO

## Maxalli

- 22 cutub oo dhibco ah
- La adeegsaday rafcaanada, shabaqyada badbaadada si loo buuxiyo shuruudaha qiimaynta
  - AMA Go'aaminta Muraaqibka ee Shahaada Maxalliga

## Guddiga

- 22 cutub oo dhibco ah
- Dhibcaha baasitaanka ee la kasbaday (65+)* ee dhammaan qiimeynta loo baahan yahay (4 +1)

## Guddiga la socota Magacaabista Sare

- 22 cutub oo dhibco ah
- Dhibcaha baasitaanka ee la kasbaday (65+) ee dhammaan qiimeynta loo baahan yahay (7 + 1)
  - Imtixaanno dheeri ah ayaa loo baahan yahay
    - +2 xisaab
    - +1 saynis
- Isku xigxigga dhammeeyay

* Ardaygu wuxuu rafcaan ka qaadan karaa hal buundo imtixaanka Guddiga ah ee 5 dhibcood ee baasida oo wuxuu wali heli karaa Shahaadada Guddiga

# SIJILAATAYN & AYIDAAD

**Shahaada Maxalliga ah**

- Ayidaada Farsamo



**Shahaadada Guddiga**

- Ayidaada Farsamo
- Sijilaatayn Lab-luqaddoodka
- Ayidaad Maamuusan

**Guddiga la socota Magacaabista Sare**

- Ayidaada Farsamo
- Sijilaatayn Lab-luqaddoodka
- Ayidaad Maamuusan
- Ku guuleysiga Xisaab iyo/ama Saynis

# BUUNDOOYINKA JIRA EE SHAHAADADA AANU AHAYN

**Xirfaddaha iyo Guusha Buundada Bilowga**

- Waxaa loo diyaariyay Ardayda Naafada ah ayaa lagu qiimeeyaa iyada oo la isticmaalaya Qiimeynta Beddelka ee NYS
- Waa inay la socdaan dukumentiyaal sheegaya xirfaddaha iyo kartida ardayga iyo heerarka madax banaani horrumarinta shaqo ee akadeemiyadda iyo xirfaddaha aassaasiga ee loo baahan yahay iskuulka ka dib in lagu noolaado, barashada iyo shaqada
- Ardayda waa inay dhammaystireen:
  - ≥ 12 sano oo dugsi ah (aanay ku jirin dugsiga barbaarinta caruurta)
  - sanad dugsiyeedka ay gaareen da'da 21 jir

**Aqoonsiga Bilaabida CDOS**

- Waxaa heli kara dhammaan ardayda oo dhan
- Ardayda ayaa iskudaya, laakiin aanu si guul leh aanu u dhammaystiraan dhammaan shuruudaha shahaadada Gobolka New York
- Ardaydu waa inay dhammaystiraan dhammaan shuruudaha Shahaadooyinka Aqoonsiga Bilowga ee CDOS

NYS ED .gov

# WEECINTA QAABKA OO GOBOLLADA KU BAAHSAN

- Gobollada waxay wax ka beddelayaan ama ku darayaan tirada dalabyada ee ay heli karaan ardayda si ay uga qalin-jabisa dugsiga sare.
- Gobollada waxay sameynayaan isbadal ku aadan qiimeyntooda looga baahan yahay qalin-jabinta dugsiga sare.
- Gobollada waxay sahminayaan habab waxtar leh oo cusub ee loo maro dariiqyada dugsiga sare (tusaale ahaan, shahaadooyinka ku saleysan kartida, adeegsiga qiimeynta ku saleysan waxqabadka, mashariicda (capstone) iyo ku darista barashada shaqada ku saleysan ama fursadaha kale ee khibradaha).

Halka laga soo xigtay: Xogta Guul laga gaaro Kulliyada-iyo u Diyaargarowga Natiijooyinka Ardayda, Sahminta Sebtember 2019 https://highschool.achieve.org/college-and- career- hore-student-outcomes-data-explorer

# SHURUUDAHA QALLIN-JEBINTA GOBOLKA: SHAQO KOORSO

- Tirada koorsooyinka ee la isaga baahan yahay qayb kasta oo maadooyin ah ayaa aad ugu kala duwan gobollada iyo degmo dugsiyeedka (tusaale ahaan, labo dhibco iyo afar dhibcood ee xisaabta)
- Gaar ahaan koorsooyinka aad ayey ugu kala duwan yihiin gobolada iyo degmo dugsiyeedka (tusaale ahaan, seddex dhibco oo saynis ah iyo baayoolaji, kimistari, fiisikis)

Halka laga soo xigtay: Xogta Ku Guuleysashada Shuruudaha Qalin-jabinta Sahminta, Dalabyada Fasalka 2019 ee https://highschool.achieve.org/graduation-requirements-data-explorer

# SHURUUDAHA QALLIN-JEBINTA GOBOLKA: QIIMAYNTA DUGSIGA SARE

Qiimeyntu ma lahan cawaaqibbo ah oo ardayga uga imaanayso ee la xiriirta buundooyinka koorsada ama qalin-jabinta

Cabbirka qiimeynta waxay u dhigantaa sida imtixaanka kama dambaysta ah ee koorsada, waxayna ku kordhineysaa boqolkiiba 5-30% sida buundada koorsada ee ugu dambeysa ardayga.

Ardaydu waa inuu keenaa gebi ahaan dhibcaha ugu yar ee laba ama in ka badan ah si ay u qalin-jebiyaan. Ardayda ayaa buundo hoose ee hal imtixaan ku bedeli kara buundo kale oo sareeysa.

Ardayda waa inay ku baasaan hal ama in ka badan qiimeyn (qiimeeyayaal) si ay u qalin-jabiyaan.

# SHURUUDAHA QALLIN-JEBINTA GOBOLKA: WAXBARIDA MANHAJ-HOOSAADKA & KHIBRADAHA HOGAAMINTA IYO ASTAAMAHA

- Qibradaha barashada iyo hogaaminta waxaa ka mid ah barashada shaqada ee ku saleysan shaqada; barashada adeegga; ama howsha manhajka, sida kaqaybgalka tartamada ururada ardayda farsamada ee gobolka.
  - Laba iyo toban gobollo cabbirka Qibrada Barashada Manhajka iyo Khibrada Hogaaminta ee nidaamkooda la-xisaabtanka gobolkooda ama federaalka, ayaa badanaa qayb ka mid ah CCR "barta dalabka" "menu".
  - In ka yar 10 gobol ayaa ka mid ah qibradda shaqo, barasho adeeg, diiwaangelin ama wax la mid ah oo qayb ka ah shuruudaha qalin-jabinta.

Halka laga soo xigtay: Sameynta Diyaarsanaanta Shaqada waxay u Dhigantaa 3.0: https://www.achieve.org/publications/making-career-readiness-count-30

# WAXBARIDA MANHAJ-HOOSAADKA & KHIBRADAHA HOGGAAMINTA WAXAA LAGU SOO DARAY NIDAAMYADA LA-XISAABTANKA DUGSIGA SARE




Halka laga soo xigtay: Sameynta Diyaarsanaanta Shaqada waxay u Dhigantaa 3.0
https://www.achieve.org/files/2019%20Assessments%20Brief_final_1.pdf

# SHURUUDAHA QALLIN-JEBINTA GOBOLKA: AQOONTA

- Dalabyada qalin-jabinta* waxay qaadataa qaabab badan, oo ay ku jiraan ayidaad, shaabadooyin, wadooyin, iyo shahaadooyin.
- Gobollada waxay bixiyaan in ka badan 115 dalabyo ah qalin-jabinta dugsiga sare ee kala duwan oo loogu talagaly ardayda.
- Loogu talagalay Fasalka 2019:
  - 14 gobol ayaa lahaa seddex dalabyo ama in ka badan oo qalin-jebin ah.
  - 15 gobol ayaa lahaa laba laba dalabyo oo qalin-jabin ah.
  - 21 gobol iyo DC waxay lahaayeen hal dalab oo qalin-jabin ah oo gobolka uu qeexay.

*Dalabyada qalin-jabinta micnaheedu ma aha imtixaanada looga baxo. Balse waxay ka mid yihiin ayidaada, sijilaada, waddooyinka, iyo shahaadooyin

Halka laga soo xigtay:  Xogta Guul laga gaaro Kulliyada-iyo u Diyaargarowga Natiijooyinka Ardayda, Sahminta Sebtember 2019 https://highschool.achieve.org/college-and- career- hore-student-outcomes-data-explorer

# SHURUUDAHA QALLIN-JEBINTA GOBOLKA: QOONTA (*SII SOCOTA*)



# WAJIGA I: XOG URURIN & WAXBARASHO

## WADAHADALLO KOOX:

- U kala baxa kooxo ka kooban 8-10 si aad uga wada hadashaan 5 su'aalood oo idin hagaya.
- Koox kasta waa in loo xilsaaraa doorarka soo socda:
  - a duube in la qoro oo la duubo jawaab-celinta SED iyada oo loo marayo kombiyuurka dhabta (laptop) ee miiska saaran;
  - a daadihiye oo haga wada-hadalka miiska isla markaana la socda waqtiga; iyo
  - a afhayeen oo soo sheegi doona fikirkadda ugu muhiimsan kooxdaada.

# WAJIGA I: XOG URURIN & WAXBARASHO

**WADAHADALLO KOOX - csii socda**

- Koox kastaa waa inay qaadataa waqti ay kaga doodo oo ay jawaab-celin u siiso Waaxda *mid kasta* ee 5-ta su'aalood ee hagaya iyaga oo xogta gelinaya foomka su'aalaha gelinaya kumbiyuutarka la saaray miis kasta.
- Dhamaadka saacadda wadawada hadalka kooxda, koox kasta ayaa dooran doonta *mid* fekrada ugu muhiim oo afhayeenkooda uu la wadaagi doono kooxda oo dhan wax aan ka badnayn 2 daqiiqo soo jeedin doona.

# WEJIGA 1: XOG ARUURIN & BARASHADA SU'AALAHA HOGAAMINTA KULANKA

1. Maxaan u baahan nahay inay ardaydu ogaadaan oo ay karti u yeeshaan inay sameeyaan kahor intayna qalin-jabin?

2. Sideen ardayda uga baahan nahay inay u muujiyaan aqoontaas iyo xirfadahaas oo kale?

3. Sideed u qiimayn ama u cabbiri la'hayd waxbarashada iyo guulaysiga (markay khuseyso jawaabaha ku aaddan #2 ee kor ku qoran) si aad u hubiso inay yihiin tilmaamayaasha dhammaystirka dugsiga sare?

4. Sidee ayay qiimaynta guusha loogu cabbiri karaa sida saxda ah ay uga tarjumayaan xirfadaha iyo aqoonta dadkeena gaarka ah, sida ardayda naafada ah iyo bartayaasha luqadda Ingiriisiga?

5. Waa maxay shuruudaha koorsada ama imtixaannada oo hubin doona in ardayda loo diyaariyo tacliinta sare iyo shaqooyinka ama ka qeybgalka arrimaha bulshada?

# JADWAL NUQUL QORAAL HORE

| | |
|---|---|
| **Wajiga I: Xog Ururin & Waxbarasho** | • **Noofambar 2019 illaa Abril 2020:**<br>▫ U fiirsiga qoraallada cilmibaarista iyo waxqabadyada ka jira gobollada kale. Guddiga ugu Warbixi Gu'a (Spring) 2020<br>▫ Koox hawleedka deegaan waxay kullamada ay qaban doonaan inta lagu jiro bisha Janaayo si ay u soo ururiyaan jawaab gelinta laga helo gobolka oo dhan.<br>• **Xaggaaga 2020:**In la aasaaso Guddi Tayo Tacliimeed (Blue Ribbon Commission) (BRC) iyo in la qoro jadwalka kulanka.<br>• **Xaggaaga (summer) 2020:**Ururi Jawaab celinta Shirka Deegaanka |
| **Wajiga II: Guddi Tayo Tacliimeed** | • **Seteember 2020:**(Kulanka koowaad ee Guddiga BRC ayaa shiraya oo caddaynaha xadka howshiisa.<br>• **Oktoobar 2020:**Shirka labaad ee Guddi Tayo Tacliimeed si loo garto aagagga mudnaanta la siinayo iyo qaab loogu talagalo horay u socodsiinta. In la aasaaso kooxo hoosaad loogu talagalay aagagga mudnaanta.<br>• **Nofeembar 2020** Febraayo 2021:Kulanka kooxo hoosaadka.<br>• **Maarso 2021** Maajo 2021:Kooxo hoosaadka ayaa soo saari doona talooyinka la soo jeediyay.<br>• **Xagaaga** Deyrta (Fall) 2021:Kooxo hoosaadka ayaa horay ugu sii gudbin doona talooyinka ay BRC soo jeedisay.<br>• **Deyrta 2021** **Jiilaalka (Winter)** 2022:Guddiga BRC ayaa waxay dhammeystireysaa talooyinka la soo jeediyay oo warbixin ayaa la diyaarinayaa. |
| **Wajiga III: Wadahadalka Guddiga** | • **Jiilaal 2022:**Warbixinta ugu damabaysa oo Guddiga Tayada Tacliinta ayaa la soo hordhigi doonaa Golaha Maamulka Tacliinta si ay u texgeliyaan. |

# BOGGA INTERNETKA CABBIRRADA QALIN-JEBINTA

Bogga Cabbirrada Qalin-jebinta
www.nysed.gov/grad-measures

## Graduation Measures

The Board of Regents and State Education Department have undertaken a thoughtful and inclusive review of the State high school graduation measures. Our ultimate goal is to reaffirm what it means to obtain a diploma in New York State and what that diploma should signify to ensure educational excellence and equity for all students in New York State.

### Regional Meeting Schedule



### Video: Regional Meetings




### Board of Regents Presentations



### Chancellor's On Board Columns



### Recent News

JANUARY 13, 2020
Board of Regents and Education Department Announce First Regional Information Meetings to Discuss Review of Graduation Measures in New York State
The meetings are an integral part of Phase I in the Board and Department's review of graduation measures.

NOVEMBER 4, 2019
Board of Regents and NYSED Launch Phase I of Review of New York State Graduation Measures

VIEW MORE NEWS

CURRENT DIPLOMA REQUIREMENTS

SUBSCRIBE FOR UPDATES

CONTACT US

NYS ED .gov

# GABOGABO

- Rayi-uruinta Bixitaanka Ka-qeybqaataha iimeel ayaa lagu soo diri doonaa. Fadlan nala soo socodsii fikradahaaga ku aaddan hanaanka kulanka maanta.

WAAN KAAGA MAHAD CELINAYNAA KA QAYBQAADASHADAADA IYO JAWAAB-CELINTAADA!